# JamhuuriyadaSomaliland

## Golaha Wakiilada JSL



# Warbixinta

## Wax-qabadkii Golaha Wakiilada

## Sanadkii 2015-ka

**Contact:-**
Somaliland House of Representatives Building
Mobile:- +252-634425218 and +252-634424837
golaha@somalilandparliament.net
Visit the House Website www.Somalilandparliament.net or www.Somalilandparliament.com

# Warbixinta Sanadkii 2015-kii ee Wax qabadka Golaha Wakiilada

Sanadkii 2015-ka Golaha Wakiiladu wuxuu yeeshay saddex kal-fadhi iyadoo Gudiyada Golaha isugeyn ay kulamo yeesheen 113 kulan, sidaa darteed Warbixintani waxay xambaarsan tahey wax qabadkii sanadkaas oo ka kooban Mashaariicda Sharci ee Goluhu ka doodey iyo kuwa uu ansixiyay, Masuuliyiinta Qaran ee uu Ansixiyay iyo kuwa Golweynaha iyo Gudiyaduba la kulmeen, Go'aamadii Goluhu gaadhey oo taariikheysan iyo Guud ahaan waxyaabihii sanadka u soo kordhay Golaha Wakiilada.

Warbixintu waxay xuseysa hawl kasta iyo dhacdo kasta iyadoo taariikheysan maalinta ay dhacdey iyo cida hawshaa qabateyba.

## 1. Kal-fadhiyadii Golaha ee 2015-ka:-

| No. | Kal-fadhiga | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Kal-fadhigii 26aad | 24 November 2014 to 13 January 2015 |
| 2. | Kal-fadhigii 27aad | 14 March 2015 to 26 May 2015 |
| 3. | Kal-fadhigii 28aad | 08 August 2015 to 27 September 2015 |
| 4. | Kal-fadhigii 29aad | 28 November 2015 to 16 January 2016 |

## 2. Fadhiyada ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen: -

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Fadhiyadii Gole weynaha | 99 Fadhi |
| 2. | Fadhiyadii Gudidda Joogta | 17 Fadhi |
| 3. | Fadhiyadii Gudiyada kale | 96 Fadhi |
| | **Isugeyn** | **212 Fadhi** |

## 3. Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Goluhu ka dooday: -

| No | Xeerka | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Duulista Madaniga | 05/April--*30/March/2015* |
| 2. | Xeerka Nidaamka Xukuumada | 25/05/2015 |
| 3. | Xeerka Waxbarashada | 22/08/2015 |
| 4. | Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha | 05/09/2015 |

| | | |
|---|---|---|
| 5. | Xeerka ka-hortaga Kufsiga | 16-15/12/2015 |
| 6. | Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2016ka | 27-29/12/2015 |

## 4. Xeerarka Madaxweynaha u gudbey si uu dhaqan-galiyo:-

| No | Xeerka | Taariikhda | Loo Gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Dhowrida Tayada | 05/05/2015 | Madaxweynaha |
| 2. | Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta | 07/12/2015 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Nidaamka Xukuumada | 12/01/2016 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Duulista Madaniga ah | 12/01/2016 | Madaxweynaha |
| 5. | Odoroska Miisaaniyada 2016-ka | 03/01/2016 | Madaxweynaha |

## 5. Masuuliyiiinta Qaran ee Golaha hor-yimi:-

| No | Masuulka | Warbixinta |
|---|---|---|
| 1. | Gudidda Komishanka Dooraashooyinka Qaranka | Arrimaha Doorashoonka iyo Wakhtigooda |
| 2. | Md. Maxamuud Xaashi Cabdi Wasiirka Duulista Hawada | Warbixin iyo Su'aalo ku saabsan Xeerka Duulista Madaniga ah |
| 3. | Agaasimaha Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada | Warbixin Kufsiga iyo Tacadiyada Ka dhanka ah Haweenka. |
| 4. | Marwo. Zamzam Cabdi Aadan Wasiirka Wasaarada Maaliyada | Warbixinta Odoroska Miisaaniyada 2016ka |

## 6. Ansixinta Masuuliyiinta Qaran: -

| No. | Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey | Xilka Masuulka | T/la ansixiyey |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Baashe Cali Jaamac | Wasiirka Wasaarada Biyaha | 11/04/2015 |
| 2. | Md. Maxa'ed Aw Dahir Ibraahin | Wasiirka Wasaarada Beeraha | 11/04/2015 |
| 3. | Md. Cabdilahi X. Jaamac Cali | Gudoomiyaha Baanka Dhexe | 11/04/2015 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Md. Cumar Sh. Maxamuud Faarax | Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha | 11/04/2015 |
| 5. | Md. Axmed Maxamed Nuur (Indhacase) | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer miyiga | 11/04/2015 |
| 6. | Md. Axmed Faarax Cadare | Wasiir ku-xigeenka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka ee Wasaarada Arrimaha Gudaha. | 11/04/2015 |
| 8. | Md. Yuusuf Cismaan Garas | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Ciyaaraha, Dhalinyarada iyo Dalxiiska | 11/04/2015 |
| 9. | Md. Siciid Cabdi Maxamuud Jaamac | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Duulista iyo Hawada. | 11/04/2015 |
| | Md. Maxamed Mixile Boqore | Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha | 11/04/2015 |
| 10. | Md. Maxamed Faarax Ducaal | Wasiiru-dawlaha Wasaarada Macdanta iyo Tamarta. | 11/04/2015 |
| 11. | Md. C/rashiid Xusen Cabdle | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Cadaalada | 11/04/2015 |
| 12. | Md. Cali Axmed Maxamed | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Warshadaha | 11/04/2015 |
| 13. | Md. Jaamac C/laahi Biin | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga | 11/04/2015 |
| 14. | Md. Axmed Nuur Aw Cabdi Shaacir | Wasiir ku xigeenka Wasaarada Maaliyada | 11/04/2015 |
| 15. | Md. Rashiid Ismaaciil kaahin | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Waxbarasha iyo Tacliinta Sare | 11/04/2015 |
| 16. | Md. Cabdi Daahir Camuud | Wasiir ku-xigeenka Aminga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha | 11/04/2015 |
| 17. | Md. Shuceyb Maxamed Muse | Wasiirka Wasaarada Warshadaha | 26/04/2015 |
| 18. | Md. Maxamed H. Aadan Cilmi | Wasiir ku-xigeen Wasaarada kaluumeysiga iyo Kheyraadk Bada | 26/04/2015 |
| 19. | Md. C/laahi Faarax Meydhane | Wasiirka Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dalkxiiska | 19/12/2015 |
| 20. | Md. C/laahir Ibraahi Habne (C/laahi Dheere) | Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 19/12/2015 |
| 21. | Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan) | Wasiirka Hawlaha Guud iyo Gaadiidka | 19/12/2015 |
| 22. | Md. Cali Xuseen ismaaciil Jirde | Wasiirka Qorsheynta iyo Horumarka | 19/12/2015 |
| 23. | Md. Keysar C/laahi Maxamed | Wasiir ku-xigeenka Ganacsiga | 19/12/2015 |
| 24. | Md. Axmed Maxamed Ismacil (Keyse) | Wasiir ku-xigeenka Arrimaha Dibada | 19/12/2015 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 25. | Md. Eng. Cabdi Maxamed Hiirada | Wasiir ku-xigeenka Hawlaha Guud | 19/12/2015 |
| 26. | Md. Cisman Axmed Jama | Wasiir ku-xigeenka Cadaalada | 19/12/2015 |
| 27. | Md. Cabdi Yusuf Ismaciil | Wasiir ku-xigeenka Qorsheynta | 19/12/2015 |
| 28. | Md. Aadan C/laahi Cabdule | Wasiir ku-xigeenka Dib U-dejinta | 19/12/2015 |
| 29. | Md. Boos Mire Maxamed | Wasiir Ku-xigaanka Gaashaandhiga | 19/12/2015 |
| 30. | Eng. C/rashiid Maxamed Cali (Riyo-raac) | Wasiiru Dawlaha Xanaanada Xoolaha | 19/12/2015 |
| 31. | Md. Mahdi Cisman C/laahi (Buuri) | Wasiiru-dawlaha Caafimaadka. | 19/12/2015 |
| 32. | Md. C/raxman Axmed Ismaciil | Wasiiru-dawlaha Macdanta iyo Tamarta. | 19/12/2015 |

## 7. Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2016-ka: -

Wasaarada Maaliyadu waxay Odoroska Miisaaniyada 2016-ka u soo gudbisey Golaha Wakiilada 05/12/2015, iyadoo Wasaarada Maaliyadu labadii sano ee ugu dambeeya ay Golaha ku horkeentay Miisaaniyada iyada oo lagu jiro bishii December.

Hadaba, Wasiirka Maaliyada oo ay Waheliyaan Masuuliyiinta ugu sareysa Wasaaradaasi sida Wasiiru-dawlaha Wasaarada Maaliyada iyo Agaasimaha Guud, waxayna Warbixin Golaha ka siiyeen Miisaaniyada 2016ka 05/12/2015, iyadoo Miisaaniyadaasi ay aheyd lacag dhan **1,218,000,000,000/= Sl Sh**, oo u dhiganta dollar ahaan**$ 203,000,000 (laba boqol iyo Sedex Milyan oo dollar)** waxayna ka badneyd Miisaaniyadii sanadkii ka horeeyay 2015-ka oo aheyd **$1,080,000,000** waxayna ka badantahay tahey **138,000,000/=sl sh**

Sida shaxdan hoose ka muuqata Miisaaniyada 2016ku waxay ka kooban tahay:-

| NO | Hay'adda | SLSH | Dollar |
|---|---|---|---|
| **1.** | Dawladda Dhexe | 1,218,000,000,000 | $203,000,000 |
| **2.** | Hayadaha Madaxa Banaan | 226,580,189543 | $37,763,365 |
| **3.** | Dawladdaha Hoose | 189,609,406,597 | $31,601,568 |
| **4.** | Dakhliga Deeqaha caalamiga ah (Denmark& Britain) | 109,861,212,000 | $18.310,202 |
| **5** | Dakhliga Mashruuca maamul Daadejinta | 27,630,234,000 | 4,605039 |
| | **Isugeyn** | **1,771,681,042,140** | **$295,280,174** |

## 8. Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah:-

| No. | Magaca Xeerka Golaha wali horyaal | Cida Gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Duulista Madaniga ah | Goleweynaha |
| 2. | Wax ka badalka Xeerka Booliiska | Goleweynaha |
| 3. | Xeerka Hay'adda Dhowrida Tayada | Guurtida ka soo noqdey |
| 4. | Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duurjoogta | Guurtida ka soo noqdey |
| 5. | Wax ka badalka Xeerka Xabsiyada | M/weynaha ka soo noqdey |
| 6. | Wax ka badalka Xeerka Assaaska Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda | M/weynaha ka soo noqdey |
| 7. | Xeerka Midaynta Cashuuraha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 8. | Xeerka Caymiska Qaranka | Gudidda Dhaqaalaha |
| 9. | Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency | Gudidda Dhaqaalaha |
| 10. | Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka | Goleweynaha (Ad hoc Committee) |
| 11. | Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud | Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada |
| 12. | Xeerka Kufsiga iyo dambiyada Galmada (rape bill) | Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada |
| 13. | Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 14. | Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 15. | Xeerka Ciyaaraha | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 16. | Xeerka Waxbarashada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 17. | Xeerka Macdanta (Miniral Act) | Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah |
| 18. | Xeerka shidaalka (patrolium Act) | Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah |
| 19. | Xeerka ka hortaga Argagixisada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 20. | Xeerka Nidaamka Xukuumada. | Gudidda Joogta iyo Anshaxa |
| 21. | Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada | Gudidda Joogta iyo Anshaxa |

## 9. Go'aamadii Goluhu Gaadhey:-

| No. | Go'aanka | Taariikhda la gaadhey | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Ansixinta Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duurjoogta | 05-01-2015 | Golaha Guurtida |
| 2. | Xisaab xidhada Miisaaniyada 2008-2013 | 10-10-2015 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3. | Ansixinta Ajandaha 27aad | 16/03/3015 | Shir-gudoonka |
| 4. | Ansixinta laalista Takaaliifta aan sharciga ahayn ee la saaray Gaadiidka | 11-01-2015 | Madaxweynaha |
| 5. | Ansixinta Wasiirka Beeraha Md. Maxamed Aw daahir Ibraahim | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 6. | Ansixinta Wasiirka w. X. Xoolaha Md. Cumar Sh. Maxamed Faarax | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 7. | Ansixinta Wasiirka Biyaha Md. Baashe Cali Jaamac | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 8. | Ansixinta Wasiir Wasaarada Warshada Md. Shucayb Maxamed Muuse | 26-04-2015 | Madaxweynaha |
| 9. | Ansixinta Wasiiru Dawlaha Macdanta iyo Tamarta Md. Maxamed Faarax Ducaale | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 10. | Ansixinta Wasiir ku xigeenka W. Gaashaan dhiga Md. Jaamac Cabdilaahi Biin | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 11. | Ansixinta wasiir ku xigenka kaluumaysiga iyo khayraadka badaha Md Maxamed x. Adan Cilmi | 26-04-2015 | Madaxweynaha |
| 12. | Ansixinta wasiir ku-xigeenka W. dhalinyarada ciyaaraha dhaqanka iyo dalxiiska Md. Yusuf Cimaan Garas | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 13. | Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Cadaalada Md. Cabdirashiid Xuseen Cabdille(carab) | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 14. | Ansixinta wasiir ku xigeenka W. Duulista Iyo Hawada Md. Siciid Cabdi Maxamuud Jaamac | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 15. | Ansixinta wasiir ku xigeenka W. warashadaha Md. Cali Axmed Maxamed(dhagoole) | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 16. | Ansixinta Wasiir ku xigeenkaga maamulka gobolada/degmooyinka ee wasaarada Arimaha Gudaha Md. Axmed Faarax Cadare | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 17. | Ansixinta wasiir ku xigeenka W. Deegaanka iyo Horumarinta Reermiyiga Md. Axmed Maxamed Nuur (indho-case) | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 18. | Ansixnta wasiir ku xigeenka W. waxbarashada iyo tacliinta sare | 11-04-2015 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Md. Rashiid Ismaaciil Kaahin | | |
| 19. | Ansixinta wasiir ku xigeenka W. Maaliyada Md. Axmed Nuur Aw cabdi Shaacir | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 20. | Ansixinta Gudoomiyaha Baanka Dhexe Md. Cabdilaahi X. Jaamac Cali | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 21. | Ansixinta Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada Md. Maxamed Mixile Boqore | 11-04-2015 | Madaxweynaha |
| 22. | Ansixinta Gudida Hay'ada Dhawrista Tayada | 05-05-2015 | Madaxweynaha |
| 23. | Ansixinta Xeerka Duulista Madaniga ah | 05-05-2015 | Golaha Guurtida |
| 24. | Ansixinta Laalista bixinta Haamaha kaydka shidaalka Berbera | 30-08-2015 | Madaxweynaha |
| 25. | Ansixinta Ajandaha 28aad | 15/08/2015 | Goleweynaha |
| 26. | Ansixinta Xeerka Nidaamka Xukuumada | 24-05-2015 | Golaha Guurtida |
| 27. | Ansixinta Go'aanka Mooshinka laalista Heshiiska Wareejinta Haamaha Shidaalka | 30-08-2015 | Madaxweynaha |
| 28. | Ansixinta Xeerka Ilaalinta, kaymaha iyo Duur joogta | 07-12-2015 | Madaxweynaha |

## 10. Fadhiyada Wadajirtka iyo Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha: -

Labada Gole waxay yeesheen saddex Fadhi oo wada-jir ah, fadhiga hore Waxay Mudanayaasha labada Gole ku dhageysteen Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha ee sanadka 2015ka, Fadhigaas oo ahaa 28/03/2015, Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo** Wuxuu fadhigaa ka jeediyay Khudbad dhinacyo badan taabaneysa oo u badan wax qabadkii Xukuumada sandkii 2014ka iyo wixii ka dambeysay.







Waxyaabaha khudbadu ka koobneyd waxaa ka mid ahaa Dhinacyada Waxbrashada, Caafimaadka, Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta, Safaro uu Madaxweynuhu Gobolada dalka ku tagey iyo kuwo dibada ahba, sidoo kale Xaalada Siyaasadeed ee Dalka iyo guud ahaan Mandaqada inagu xeeran.

labadaa fadhi ee kale waxay kala ahaayeen mid qabsoomey **25/04/2015** oo mudanayaasha labada Gole ugu codeeyeen in Gudoomiyihii Maxkamada Sare **Md. Yuusuf Ismaaciil Cali** oo Madaxweynuhu xilka ka qaadey isla markaana labada Gole u soo gudbiyay Cod u qaadaan xil ka qaadistiisa sida Sharcigu dhigayo, waxayna Mudanayaasha labada aqalba ka ogolaadeen Madaxweynaha Xilka qaadista Gudoomiyihii Maxkamada Sare.

Fadhiga labaad ee labada Gole Wada-jir u yeesheena wuxuu qabsoomey **02/06/2015,** waxaana lagu ansixinayay fadhigaa Gudoomiyaha Maxkamada Sare **Md. Aadan X. Cali** oo Madaxweynaha Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo** u Magacaabey jagadaa ka dib markii xilkii laga qaadey Gudoomiyihii hore, waxayna Mudanayaasha laba aqalba Cod Aqlabiyad ah ku Ansixiyeen Gudoomiyaha Maxkamada Sare inuu noqdo **Md. Aadan X. Cali.**

## 11. Mooshinada Sanadka 2015-ka Golaha la horkeenay: -

Intii lagu jirey Sanadkii la soo dhaafey ee 2015-ka Waxaa Golaha la keenay Mooshino badan oo uu ugu saameyn badnaa mooshinkii Wareejinta Haamaha shidaalku, mooshinkaas oo Muran siyaasadeed oo dhex marey Xukuumada iyo Golaha Wakiilada uu ka dhashey waxaana laga dareemay dalka oo dhan.

Waxa kale oo ka mid ahaa mooshinadaas kii ku saabsanaa Xeerka Ganacsiga Baananka oo isna Golaha ka dhaliyay dooda dadka oo dhan laga dareemay, Moonshineda Golaha la keenay waxay kala ahaayeen Mooshinadan kala ahaa:

| No. | Ujeedada Mooshinka | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Mooshin ku saabsan laalista Kharash Baabuurta Dekada ka soo degta la saarey. | 11/04/2015 |
| 2. | Mooshin ku saaban Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka | 23/05/2015 |
| 3. | Mooshin ku saabsan Sixir Bararka | 23/05/2015 |
| 4. | Mooshin ku saabsan Wareejinta Haamaha Shidaalka | 30/08/2015 |
| 5. | Mooshin ku saabsan Xeerka Ganacsiga Baananka | 10/01/2016 |

## 12. Waxqabadyadii Gudiyada Golaha: -

### Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

**07/04/2015**, Guddiida dhaqaalaha iyo maliyadu waxay kulan xog waraysi ah la yeelatay Ganacsatada Gaadiidlayda iyo Macdarada oo ku saabsanaa arinta Gaadiidka ku xayirnaa dekeda Berbera oo lagu soo rogay cashuur lagu baadhayo gadiidka ka soo degaya Dekada.

Sidoo kale Gudidda dhaqaalaluhu waxay kormeer shaqo ugu baxeen magalada Berbera kormeerkaas oo ku saabsanaa arinta gadiidka lagu soo rogay ee ahayd cashuur lagu baadhayo gadiidka taas oo ay bulshada gaadiidlayda ahi cabasho ka muu jiyeen.

**10/04/2015,** Gudiidu waxay kulan la yeelatay Gudoomiyaha Baanka dhexe Md. Cabdilaahi Xaaji Jamac Ali kulankaas oo ahaa mid xog waraysi, waxaana laga hadlaayay arimaha sixirbmararka.

**28/04/2015,** Gudiddu waxay la kulantay wasiirka Wasaarada Maaliyada Mar. Zamzam Abdi Aadan kulan kani waxa uu ku saabsanaa ama laga hadlaayay: -

- ✓ Arinta Zaadka.
- ✓ Arimaha Cashuuraha.

Gudidda dhaqaaluhu iyagoo gudanaya waajibaadkeeda Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu siinayo, waxay kormeer shaqo kusoo martay Xarumaha Dhaqaalaha, kormeer kan oo ku saabasana ariiimaha miisaniyad sanadeedka 2016ka iyo hubinta inay soo baxday kutalogalkii miisaaniyada 2015, si arintaas ay u ogaatana waxay kormeero xogo-gaalnimo ku booqdeen: -

1. Haamaha Shidaalka Berbera
2. Dekeda Berbera
3. Kastamka cashuuraha  Berbera
4. Kastamka cashuuraha  Burco
5. Wakaalada Biyaha Hargeisa
6. Xarunta Wasaarada maaliyada JSL Hargeisa.

Sidoo kale Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga oo fulineysa Waajibaadkeeda Xeer-hoosaadka Goluhu farey iyo korjoogista laamaha Fulinta gaar ahaan kuwa dhaqaalaha waxay Kormer ku tageen Wakaalada Biyaha Hargeysa iyo Wasaarada Maaliyada oo ay kulan la yeesheen Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Marwo. Zamsam Cabdi Aadan** Waxaanay guud ahaan isaga xaalwarameen horumarinta dhaqaalaha dalka iyo sidii loo dardar gelin lahaa, loona dhisi lahaa nidaam Banyaal ah oo lagu xisaabtamo, lagana hawl galo sidii loo dhimi lahaa dhaqaalaha masuuliyad darada ku luma iyo musuqmaasuqa.

Sidoo kale Gudiddu iyo Wasaarada Maaliyadu waxay kawada hadleen Miisaaniyada 2016ka oo Wasaarada Maaliyadu dhameystirtey sameynteeda isla markaana dhowaan in Golaha ay u soo gudbiso la filayo ka dib marka Golaha Wasiiradu soo ansixiyo.

Xaga Masuuliyiinta Qaranka, Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran si Goluhu ugu ansixiyo Xilka Madaxweynuhu u Magacaabey, kuwaas oo ka mid yihiin: -

- Gudoomiyaha Bangiga Dhexe Md. Cabdilahi X. Jaamac Cali

Wasiir Ku-xigeenka Maaliyada Md. Axmed Nuur Aw Cabdi Shaacir.

**Miisaaniyada Qaranka 2016,** Waxa kale oo Gudiddu Golaha u soo gudbisey Warbixinta Miisaaniyada Qaranka 2016, ka dib markii ay ka soo shaqeysay Miisaaniyada Xukuumadu Golaha u soo gudbisay iyagoo kulamo kala yeeshay Laamaha Dawlada ee khuseyso sida Wasaarada Maaliyada, Dekada Berbera, Ilaha Dhaqaalaha iyo Hay'addo dhowr ah oo Miisaaniyada ka cabanayay.

## Gudidda Joogta iyo Anshaxa

**June-July 2015** Muddadii Golaha Wakiiladu ku jiray **fasaxii Kal-fadhigii 27[aad]**, sida uu Dastuurka Qaranka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu ku waajibinayo Guddida Joogtada & Anshaxa waxay dardargalisay xil-gudashada hawlaha Golaha u heyso iyadoo Masuul ka ah Golaha mudada Fasaxa Kal-fadhiyada lagu jiro.

Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulan xog-waran la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan oo ay ka mid yihiin: -

- Guddoomiyaha Baanka Dhexe.
- Wasiirka Wasaarada degaanka,
- Wasiirka Wasaarada warshadaha
- Wasiirka Wasaarada Caafimaadka
- Wasiirka Wasaarada Maaliyada.
- Maareeyaha wakaalada Biyaha.
- Taliyaha Laanta Socdaalka.

Sidoo kale waxa gudidu u yeedhay kana baaqsaday inuu la kulmo guddida Mayirka Caasimada Hargeysa ee Somaliland.

Gudiddu waxay Golaha u soo Gudbisey laba Xeer oo ka soo shaqeysay kuwaas oo kala ah: -

- Xeerka Nidaamka Xukuumada.

## Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

**11/01/2015** aya Gudidda Arrimaha Bulshado Golahu u soo Gudbisey Xeerka Duulista Madaniga ah oo Guddidaasi Gacanta ku heysayiyadoo Gudidda warbixinta Golaha uu uga jeediyay Gudomiyaha Gudidda **Md. Xasan Cawaale Ceynaan,** loona qeybiyay Mudanayaasha Fadhiga soo xaadirey nuqulka Lifaaqa gudidda ee Xeerka Duulista Madaniga ah.

**01 September** Guddida Diinta iyo Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada JSL Ayaa waxay booqdeen Gobolka awdal, waxayna ugu horeyn tageen xarunta caafimaadka Degmada Dila, iskuulada waxbarasho ee dila iyo meelo kale oo uu muhiim ah adeegyada bulshada, si xildhibaanadu wax badan u ogaadaan waxayna halkasi su'aalo ku waydiiyeen mas'uuliyiinta halkaasi ay kula kulmeen. Mudanayashu waxay markii dambe usii dhaafeen degmada boorama oo ay iyana kormeereen meelo badan oo muhiim u ah u adeegida shacbiga, sida goobaha waxbarashada caafimaadka iyo xafiisyada dawlada. Ee kala duwan.

Kormeerkan oo qaatay saddex maalmood ayay gudidu dib ugu soo laabteen caasimda waxaanay ka soo saareen talooyin iyo warbixin ku salaysan xaalada bulshada ee gobolka iyo sidii kor loogu sii qaadi lahaa adeegyada dawladu u qabato shacabka.

**16 September** Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diintu waxay Golaha u soo gudbiyeen Xeerka Waxbarashada oo gacanta ku hayeen, Waxayna Golaha hor keeneen Lifaaqa Xeerka Waxbarashada ee Gudidda iyo Warbixintooda waxaana

Golaha ka hor akhriyay Gudoomiyaha Gudidda Md. Xasan Cawaale Caynaan.

**19 September** ayay sidoo kale waxay gudidu kulan xogwaraysi ah kula yeelatay xafiiskeeda Wasiirka wasaaradda Ciyaaraha Dhaqanka iyo Dalxiiska ee Jamhuuriyadda Somaliland, mudane, **Ahmed Cabdi Kaahin,** isagoo wasiirku warbixin kooban ka siiyey waxqavadkiisa iyo qorshaha.

**1-4 December** Gudiddu waxay Kormeer ku tagtey Gobolka Tog-dheer iyadoo booqatey oo kormeer ku soo sameysay Dugsiyada Magaalada Burco, waxayna kulamo la yeelatey laamaha Waxbarashada ee Gobolka Tog-dheer.

Gudida Arrimaha Bulshada iyo Diintu waxay Golaha u soo Gudbisey Xeerarka kala ah: -

- Xeerka Duulista Madaniga ah
- Xeerka Waxbarashada Qaranka.

Sidoo kale Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran si Goluhu ugu ansixiyo Xilka Madaxweynuhu u Magacaabey, kuwaas oo kala ah: -

- Wasiir ku-xigeenka Tacliinta Sare Md. Rashiid Ismaaciil kaahin
- Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Md. Maxamed Mixile Boqore
- Wasiir ku-xigeenka Dhalinyarda iyo Ciyaaraha Md. Yuusuf Cismaan Garas
- Wasiir ku-xigeenka Duulista Hawada Md. Siciid Cabdi Maxamuud Jaamac

## Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

**03/12/2014** Gudidda Garsoorka, Cadaaladda la yeelatay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaanu kulan kan u jeedadiisu ahayd in Xeerarka curinta u baahan iyo kuwa amendment-ka u baahan wax laga qabto, oo Goluhu Xeerarkaa oo baahi weyn dalku u qabo, Waxaana ka mid ahaa xeerashaa.

- Xeerka Maxkamada Sare
- Dibu eegista Xeerka Nidaamka Garsoorka
- Xeerka Maxkamada Ciidamada
- Xeerka Xeer-ilaalinta Ciidanka
- Xeerka Gudidda Cadaaladda
- Dibu eegista Xeerka Xeer-ilaalinta Guud.

***02/02/2015*** Waxay Guddida Garsoorka iyo Cadaaladu Kormeer ku tageen Gobolka Saaxil, kormeerkaas oo u jeedadiisu ahayd u kuurgalida Xaalada Jeelasha, Saldhigyada iyo Guud ahaan Hanaanka Cadaaladeed iyo Adeega Garsoorka ee Maxkamadaha Gobolkaas oo qaatey mudo saddex cisho ah, iyagoo Gudiddu Kormeerkooda ka bilaabmey Magaalada Mandheera oo uu ku yaalo Jeelka ugu weyn Somaliland isla markaana ah Xarunta Tababarada

Ciidamada Somaliland, waxay uga sii Gudbeen magaalada Berbera ee Xarunta Gobolka iyagoo magaaladaasna Kormeer ku soo marey Jeelasha, sidoo kalena kulamo la yeelatey Masuuliyiinta ugu sareysa Maxkamadaha iyo Jeelasha Gobolkaas.

***30/05/2015*** Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada & Xuquuqal Insaanka waxa safar kormeer shaqo ugu bexeen Gobolka Togdheer, iyaga oo gudanaya waajibaadka uu farayo Dastuurka Qaranka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada JSL, iyagoo sidoo kale ka duulaya muhiimada ah in la helo xog-dhab ah oo ku saabsan guud ahaan Xabsiyada dalka, waaxda **Garsoorka, Xabsiyada, Saldhigyada Booliska, iyo Xeer-ilaalinta** si loo sugo xaalada maxaabiista ku xidhan, Cadaaladdooda, Garsoorka, xad-gudubyada iyo gabood falada ka dhan ah xuquuqdooda, waxaa kale oo ay gudiddu u kuur galeen siday u ogaan lahaayeen Caafimaadka, nafaqada ay helaan maxaabiista iyo nadaafada xabsiyada ay ku xidhan yihiinba.

Sidaas darteed Gudiddu iyada oo safarkoodii kormeer sii wada waxay safar shaqo ugu bexeen Gobolka Togdheer, iyaga oo ugu horayn ka bilaabay Xabsiga Burco halkaas oo ay soo kormeereen, sidoo kale waxay soo kormeereen Waaxda garoorka.

**13-14/06/2015** Gudidu waxay Gobolka Saaxil ku qabteen workshop ku saabasan xeerka kufsiga iyo tacadiyada Jinsiga oo ay maalgalinteeda lahayd Dalada Nagaad, kulankaas oo socday laba cisho ujeedadiisuna ahayd sidii ay bulshadu uga qayb qaadan lahaayeen xeerka, fikradahoodana ugu soo dari lahaayeen.

**16/06/2015** Gudidu waxay Gobolka Awdal ku qabteen workshop ku saabasan xeerka kufsiga iyo tacadiyada Jinsiga workshopkan oo maalgalintiisa ay lahaayeen hay’adda LEGEL ACTION WORLWIDE (LAW), kulankaas oo socday halcisho, ujeedadiisuna ahayd sidii bulshada reer awdal looga qayb galin lahaa xeerka afkaartoodana ugu dari lahaayeen.

***30/08/2015*** Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada & Xuquuqal Insaanka iyo Hay’ada **Legel Action worldwide** iyagoo taaba-galinaya habsami u socodka iyo ka midho-dhalinta Xeerkan Kufsiga iyo tacadiyada Jinsiga waxay u qabateen **Workshop Validation Meeting** ah oo Xeerka lagu gorfeynay.

Waxaanu uu ka qabsoomay xarunta Golaha wakiilada JSL, kulankaas oo socdey mudo laba cisho ah waxaa lagu gorfeeyay Xeerka iyadoo ka soo qeyb-galayaashu fikradahooda ku dareen, sixid iyo toosina ku sameeyeen.

***05/08/2015*** Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada & Xuquuqal Insaanka iyo Dalada Nagaad iyagoo taaba-galinaya habsami u socodka iyo ka midho-dhalinta Xeerkan Kufsiga iyo tacadiyada Jinsiga waxay u qabateen **Workshop Meeting** ah oo Xeerka lagu gorfeynay.

**5-9 December** Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku waxay Kormeer ku tagtey Gobolka Saaxil, iyadoo kulamo la yeelatey Hay'addaha Bahda Garsoorka iyo Cadaalada isla markaana kormeer ku soo martey Jeelasha iyo Xabsiyada Magaalada Berbera.

Sidoo kale Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran si Goluhu ugu ansixiyo Xilka Madaxweynuhu u Magacaabey, kuwaas oo kala ah:-

- Wasiir ku-xigeenka Cadaalada Md. C/rashiid Xusen Cabdle

## Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiicida ah

***02/02/2015*** waxay Guddida Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah kormeer ku tageen Gobolka Saaxil magaala madaxdiisa Berbera, ujeeda kormeerkaas oo aheyd wax ka ogaanshaha xaalada Deegaanka Gobolka saaxil gaar ahaan Magaalada Berbera, waxa kale oo Gudiddu Xog u raadineysay Xeer ay Gacanta ku hayso sameyntiisa oo ka mid ahaa dhowr xeer oo Gudiddu Curisey Xeerkaas oo ahaa Xeerka Ilaalinta Qashinka (Waste Management Act) kormeerkaas oo qaatey 3 maalmood waxay gudiddu booqatey Xafiiska Badhasaabka, Xafiiska Mayorka oo ay kula kulmeen Xildhibaanada Golaha Deegaanka kuwaas oo warbixin ka siiyay Xaalada Guud ee Daagaanka Magaalada Berbera iyo sidey qashinka u maamulaan.

Gudidida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga wax ay fadhiisatay ilaa 10 kal-fadhi oo ay kulmeen. Kulamadaas waxa ay ka koobnaayeen

**10/08/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxa ay la kulanatay Wasiirka Macdanta

**10/04/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxa ay Safar shaqo ku tagatay Gobolka Tog-Dheer gaar ahaan dagmada Burco iyaga oo kulamo la qatay madaxda Gobolka iyo Wakaalada biyaha ee Degmeda Burco.

**13/06/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxay ansixisay Wasiirka Xanaanada Xoolaha.

**27/06/2015–29/08/2014** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxa safar shaqo u tagtay Gobolka Togdheer gaar ahaan magaladiisa Burco oo ay xog ururin ugu tageen.

**15/05/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxa ay ansixisay Wasiirka Beeraha.

**10/07/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxay safar shaqo ku soo martay Gobolka Maroodi-Jeex afar tuul oo ku yaal xadka Somaliland iyo Ethiopia oo uu ka socday mashruuc sadex sano ah oo isku socdka dadka xadka, caafimaadka xoolaha labada dhinac, ganacsiga u dhexeeya labada xad kaas oo ay u hadhay wakhti dhan laba sano waxa anu taganay markay tarikhdu ahayd

**26/07/2015-03/08/2015** Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga waxay safar shaqo ku soo martay Gobolka Tog-dheer Lix tuul oo ku yaal xadka Somaliland iyo Ethiopia oo uu ka socday mashruuc sadex sano ah oo isku socdka dadka xadka, caafimaadka xoolaha labada dhinac, ganacsiga u dhexeeya labada xad kaas oo ay u hadhay wakhti dhan laba sano waxa anu taganay markay tarikhdu ahayd.

Guddida Deegaanku waxa ay u mahad celinaysaa cid walba oo ka qayb qadatay shaqooyinka ay qabatay waxa ay si gaar ah ugu mahad celinaysaa Yusuf Habiib Hussein oo anay la'aantii waxba suurta galeen iyo Cawad Cali Maxamed iyo Cabdilahi Cabdi Aden.

**1-4 December 2015** Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah waxay kormeer ku tagtey Gobolka Awdal Xaruntiisa Magaalada Boorame, kormeerkaas oo u jeedadiisu aheyd u kuur galida halka ay marayaan hawlaha shaqo ee laamaha Beeraha, Xoolaha, Biyaha iyo Maamulka heer Gobol iyo Degmo, kulamadaas marka laga yimaado Gudiddu waxay kormeer ku soo martey Seylada iyo Kawaanka Xoolaha iyo sidoo kale Xarumaha Gobolka ay ku leeyihiin Wasaaradaha Beeraha, Xoolaha iyo Biyaha iyo Wakaalada Biyaha SHAMBA iyagoo Maamulada iyo madaxda Xarumahaas wax ka weydiiyay siday shaqadu u socoto, waxay u baahan yihiin oo tabanayaan in wax lagala qabto si Gudiddu baahiyaha iyo xaalada laamahaas ee Gobolka Awdal ay Golaha Warbixin uga siiso.

**Xeerarka Gudiddu soo Gudbisey,** Sidoo kale Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran si Goluhu ugu ansixiyo Xilka Madaxweynuhu u Magacaabey, kuwaas oo kala ahaa:-

- Wasiirka Wasaarada **Biyah Md. Baashe Cali Jaamac**
- Wasiirka Wasaarada Beeraha**Md. Maxa'ed Aw Dahir Ibraahin**
- Wasiirka Wasaarada Xanaanada XoolahaMd. Cumar Sh. Maxamuud Faarax.
- Wasiirka Wasaarada Warshadhaa Md. Shuceyb Maxamed Muuse
- Wasiiru-dawlaha Macdanta iyo Tamarta Md. Maxamed Faarax Ducaal
- Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Deegaanka Md. Axmed Maxamed Nuur (Indhacase)
- Wasiir ku-xigeenka Kaluumeysiga Md. Maxamed H.Aadan Cilmi.

## Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

Guddida Arimaha Gudaha iyo Nabadgelyada ee golaha wakiilada ayaa waxay 03-06 October 2015 kormeer shaqo ku joogeen Gobolka Saaxil magaalo madaxdiisa Berbera waxaanay kulamo gaar gaar ah la yeesheen Badhasaabka gobolka, Garsoorka gobolka , Mayorka degmada Berbera, taliyayaasha ciidamada booliska iyo asluubta taliyaha jeelka dhexe, iyo masuuliyiinta iyo shicibka ku jira Kaamka qaxoontiga lagu hakiyo ee magaalada Berbera.

Kulankan oo ay gudidu ugu kuurgalaysay xaaladaha qaxoontiga, maxaabiista, bulshada iyo garsoorka ayaa ugu soo dhamaaday si guul ah waxaanay ka soo anbabaxeen 06 october, sidoo kale gudoomiyaha gudida **Ibraahim Jaamac Cali Rayte** oo metelayay gudida ayaa isna qayb ka ahaa kormeer shaqo oo Komishanka doorashooyinka xisviyada iyo baarlamaanku ku soo mareen Gobolada Bariga taas oo lagu qiimaynayay sidii doorashadu uga qabsoomi lahayd iyo baahiyaha goboladaas yaala.

Gudida ayaa waxay sidoo kale huteelka **Fish And Steak** ku qabatay kulan dhegeysi xeer (Legislative Hearing) kuna saabsan Xeerka Argagixisada, kulankan oo socday muddo saddex maalmood ah oo kala ah 09—11 August 2015 ayay ka soo qayb galeen 40 xubnood oo ka kala socday Hay'adaha Garsoorka, Qareenada, xuquuqal iinsaanka, jaamacadaha, iyo ururada rayidka ah.

Ugu danbayntiina waxa laga soo saaray talooyin iyo kaabis xeerkan ku saabsan si loogu dabaqo bulshada reer Somaliland, isla markaana waxa layskula qaatay in aan xeerkan lagu degdegin ansixintiisa.

**1-4 December2015** Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu waxay Kormeer ku tagtey Gobolka Awdal Xaruntisa Magaalada Boorame, kormeerkaas oo ujeedadiisu aheyd u kuur galida Xaalada Nabadgalyo ee Gobolka iyo xog-ogaal u noqoshada Baahiyaha Gobolka ee laamahaas dawlada.

Intii ay ku sugneyd Magaalada Boorame waxay kulamo la yeelatey laamaha Amniga gobolka sida Booliiska, Asluubta iyo Maamulka gobolka iyo Golaha Deegaanka Degmada Boorame oo hogaaminayo Maayarka Magaaladu, intaa ka dib Gudiddu waxay kormeer ku tagtey Saldhiga Dhexe iyo jeelka weyn.

## Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

**Jenuray – June 2015** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku iyada oo gudanaysa waajibaadka Dastuurkiga ah ee saaran, ayaa waxay kulamo xogwaraysiya la yeelatay shantii bilood ee ugu dambeeyey Wasaaradaha iyo Hay'addaha madax-banaan ee Dawlada.

**30/04/2015: -** Waxay Guddidu kulan xog-waraysiya la yeelatahay Guddoomiyaha Baanka dhexe ee Somaliland, si ay u ogaadaan habsami u socodka hawlaha Baanka, iyada oo kulankaas ay waxyaabo badani ka soo baxeen.

**06/05/2015: -** Waxay Guddidu kulan la yeelatay Wasiirada Deegaanka iyo Reermiyaga, iga oo wax ka waydiiyey sida uu deegaanku yahay iyo wixii laga qaban karo fayo dhawrsanaanta Deegaanka dalka, waxa kale ooy wax ka weydiiyeen sida ay u ticmaalaan Miisaaliyada, Shaqaalaysiinta, xeerarka iyo la shaqaynta Guddida Qandaraasyada Qaranka.

**13/05/2015:** Waxay Guddidu kulan xog-waraysiya la yeelatay Wasiirka Arrimaha Dibada si ay wax uga waydiiyaan halka ay marayso Siyaasada Arrimaha Dibada Somaliland, Caqabadaha jira iyo wixii u baahan in la iska kaashado, si looga midha dhaliyo siyaasada Arrimaha dibadda ee Qaranka. Waxay kale ooy wax ka weydiiyeen Miisaaniyada, shaqaalaysiinta iyo sida ula shaqeeyaan Guddida Qandaraasyada Qaranka.

**27/05/2015: -** Waxay Guddidu kulan xog-waraysiya la yeelatahay Guddoomiyaha Hay'adda Abaabul ka Saarka Qaranka (NDRC), si ay u ogaadaan habsami u socodka shaqo ee Hay'adda, iyaga oo wax ka waydiiyey siday u ticmaalaan Miisaaniyada, Xeerka Hay'adda, Shaqaalaysiinta iyo sida ay ula shaqeeyaan Guddida Qandaraasyada Qaranka.

**27/05/2015:-** Waxay Guddidu kulan xog-waraysiya la yeesheen Maareeyaha Haamaha Shiidaalka, kulanka oo ahaan kulan aad u muhiima oo dhinacyo

badan taabanayey, iyaga oo wax ka waydiyey Qadaraasyada sida ay u bixiyaan, Miisaaniyada Haamaha Shidaalka ,Gaadiidka iyo Shaqaalaysiinta, iyada oo guddi u kuur gali doonta habsami u socodka shaqo ee Kaydka Haamaha Shidaalka.

**20/05/2015:** Waxay Guddidu kulan xog-waraysiya la yeesheen Wasaarada Dib u Dajinta, iyaga oo wax ka waydiiya arrimaha dib dajinta ee ay Qaranka u hayso, arrimaha qaxoontiga, Gudyaha laga dhisay Gobolada ee dadka danyarta ah loo dhisay, Miisaaniyada iyo shaqaalaysiinta, idinka oo warbixintaasi ka heli kara xafiiska Guddida.

**06/05/2015:** Waxay Guddidu la kulantay Wasaarada Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda, iyaga oo wax ka waydiiyey Miisaaniyada Waraarada, Shaqaalaysiinta, la Shaqaynta Guddida Qandaraasyada iyo ku dhaqmida xeerka iyo Dastuurka dalka.

**14/05/2015:** Guddidu waxay kulan la yeelatay Hay'adda Dhawrista Tayada Somaliland, iyaga oo waydiiyey halka ay marinayaan hawshan ay qaranka u hayaan iyo waxyaabaha ay u baahan yihiin in laga caawiyo, waxa kale oo ay wax ka weydiiyeen Miisaaniyada, xeerka Hay'adda, shaqaalaysiinta iyo sida ay u maraan Guddida Qadaraasyada Qaranka.

Gudidda Ilalainta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay Kulamo kala duwan la yeelatey Masuuliyiin badan oo ka kala tirsan laamaha kala duwan ee dawlada, masuuliyiintaas oo Gudiddu ugu yeedhay Xafiiskeeda waxay ka xog-wareysaneysay Masuuliyada Wasaaradaha/Hay'addahaas kala duwan ay ka hayaan, wixii u qabsoomey iyo siday u maamulaan Miisaaniyadahooda iyo Waajibaadkooda guud, waxaana ka mid ahaa Masuuliyiintaas: -

- Wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Maalgalinta Mr. Muuse Qaasin Cumar 27/08/2015.
- Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Mr. Cali Maxamed Warancade.31/08/2015.
- Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka Dr. Sacad Xaaji Cali Shire12/9/2015.





**01/10/2015 ilaa 09/10/2015** waxay Guddidu safar shaqo ku tageen qaar ka mida gobolada dalka sida Awdal, Gabiley, Hawd, Daadmadheedh, Togdheer, Saraar, Sool, Sanaag iyo Saaxil, ujeedada safarkani waxa uu ahaa: -

- In Maamul daadejin la sameey.
- In Wasaaradihii ay Gobol kasta ka shaqeeyaan.
- In Budget loogu talo galo Gobolada dalka oo Miisaaniyada la dhaadhiciyo.





Intii Gudiddu Safarkan ku jirtey Waxay Gobol kasta kula kulmeen Maamulada Gobolada oo weheliyaan Isuduwayasha Wasaaradaha/Haya'daha Dawlada ee Gobolkasta iyo Golayaasha Deegaanka Degmooyinka magaalo madaxda u ah Goboladaas, iyadoo Gudiddu markii ay safarka ka soo noqotey ka diyaariyay Warbixin dheer iyo documentary film ay ka soo duubeen safarka iyo waxay ka soo arkeen Gobolada iyo Shaqada laamaha maamulku sidey uga socdaan.

**10-19/11/2015** waxay Gudiddu Wasaaradaha Dalka ka dalbadeen isla markaana kulamo ay xaruntooda kula yeesheen oo mid kasta kaga ururiyeen documents kala ah tirada Shaqaalaha Wasaarad kasta u joogta Gobolada dalka, Waaranada Mushaharka ay u diraaan shaqaalahooda iyo waaranada kharashaadka xafiisyada Gobolada ay u diraan, waxay 22 Wasaaradood oo la kulmeen ka soo urursadeen documentskaas.

Ujeedada ay ka lahaayeen Documentskaas ayaa daba socdey safarkaas Gobolada iyo Warbixin ay Gudiddu ka diyaarineysay sida Wasaaraduhu Gobolada dalka uga shaqeeyeen isla markaana ugu leeyihiin uguna diraan shaqaale, Mushaharada iyo kharashaad ka timaada Miisaaniyada Wasaarada walba loogu ansixiyay Odoroskii Miisaaniyadaha Dalka.



Waxay Gudiddu iyadoo kaashaneysa Shaqaalaha Golaha ay diyaarisey Warbixin aad u mihiim ah ka hadleysa xadiga Wasaarad walba ka gaadhsiiso Gobolada Miisaaniyadeeda iyo siday Miisaaniyadooda u goboleeyaan waxaana ka soo baxay Warbixin dheer oo taabaneysa 22 Wasaaradood oo ka mid ah Wasaaradaha dalka oo gudiddu dooratey ama sample u qaadatey.

Waxayna Gudiddu warbixintaas iyo Documentary Filmkii ay ka soo sameeyeen safarkoodii Gobolada iyo kulamadii Isuduwyaasha kala duwan ee Gobol kasta ku soo bandhigeen Xaflad weyn oo ka dhacdey Hotel Maansoor 25/11/2015, Xafladaas oo ka soo qeybgaleen Shir-gudoonka Golaha, Mudanayaasha, Wasiirada iyo Agaasimayaasha Wasaaradaha Dalka, Badhasaabada Gobolada, aqoonyahan, Saxaafada iyo Bulshada qeybaheeda kala duwan.

Waxay Warbixintaa Gudiddu ku soo bandhigtey Xog ku saabsan Wasaaradaha Miisaaniyadooda iyo Waxay Gobolada dalka ka gaadhsiiyaan iyagoo soo bandhigey Wasaarad walba tirada Shaqaalaha Gobolkasta u jooga, xadiga Mushaharka ay u diraan, xadiga Kharashka ay u diraan iyo inaaney u dirinba, sidoo kale waxay ku soo bandhigeen Baahiyaha yaal Gobolada iyo siday u shaqeeyaan Isuduwayaasha Gobolada Wasaaradaha u jooga, iyadoo halkaa

lagu daawadey Film documentary ah oo aad u qiiro galiyay Masuuliyiintii ka soo qeybgaley.

Xafladaas waxaa furey **Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Md. Baashe Maxamed Faarax**, ka **dib Md. C/qaadir Jamaac Xaamud, Md. Ibrahim Axmed Heybe iyo Md. Xuseen Ismaciil** oo Gudidda ka mid ah ayaa halkaa kaga warbixiyeen safarkoodii iyo waxyaabahey kala soo kulmeen.






Waxaana sharaxaad iyo faahfaahin ka bixiyay ujeedada xaflada iyo bandhigoodaba Gudoomiyaha Gudidda **Md. Maxamed Cali Xirsi** Wuxuuna Gudoomiyuhu halka ku soo bandhigey Wasaarad walba kaalinta ay ka gashey Goboleynta Miisaaniyadooda waxaana Wasaaradaha ugu fiican noqotey Wasaaradaha Waxbarashada, Deegaanka, Caafimaadka iyo Beeraha, halka Wasaaradaha Warfaafinta, Boosaha iyo Macdanta iyo Tamartu ka noqdeen kuwa ugu hooseeya ee Miisaaniyadohooda Gobolada wax ka gaadhsiiya, intaa ka dibna wuxuu halkaa ka akhriyay soo jeedimaha iyo talo-bixinada Gudidda ee Warbixintaas dheer iyo Xaalada Gobolada dalka ay ku soo arkeen.

Xidhitaankii Xaflada waxaa ka Hadley **Wasiirka Maaliyada Marwo. Zamzam Cabdi Aadan** oo soo xidhay Xaflada, Wasiiradu waxay qirtey sida loogu baahan yahay in Miisaaniyada Gobolada la gaadhsiiyo iyadoo aad ugu mahadnaqdey Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka sida xilkasnimada leh ee ay soo shaqeysay, waxay sheegtey inay aad ugu faraxdey filmkii la soo bandhigey oo ka muuqatey meelaha quruxda badan sida xafiisyada ee dadku fadhiyeen, waxayna ku boorisey in dhamaan Wasaaraduhu u tafaxeytaan sidii Gobolada dalka Miisaaniyadooda wax ugu gaadhsiin lahaayeen, isla markaan Xafiisyo uga furan lahaayeen Gobolada oo maamulka la daadejiyo ilaa heer degmooyin.

## Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

**30-May-2015,** Guddida wadooyinka iyo hawlaha guud ayaa iyana booqdey xarunta gobolka awdal ee Borama waxayna halkaasi kula kulmeen hay'adda ASARDA oo ah hay'adda wadani ah oo ka shaqaysa horumarinta wadooyinka Gobolada Awdal iyo Salal, waxayna gudida warbixino iyo waraysi arrimaha wadooyinka ee labadan gobol kaga dhagaysteen mas'uulinta hay'ada ASARDA, kuwaasi oo sheegay waxa gobolka wadooyin u qabsoomay iyo inta u qorshaysan in la dhiso ee wax laga qabto, Mudanayaashu intii ay joogeen magaalada Borama waxaa kale oo ay la kulmeen isuduwahah caafimaadka ee gobolka iyaga wax ka waydiiyey arrinta caafimaadka ee xeer gobolka, waxaanu isuduhu uga warbixiyey ariintaasi mudanayaasha.

Waxa kale oo Gudiddu booqatey ***Gobolka Sanaag iyo Wadada Ceergaabo iyo Burco*** isku xidheysa oo socota, waxayna kormeerkaas ku mareen dhamaan goobaha hawsha wadadu ka socdaan iyo hawl-wadeendaa ka shaqeynaya iyagoo warbixino kala duwan ka soo dhageystey Maamulada Wadooyinka sida wax u socdan, Caqabadaha ka hor yimi iyo wax u qorsheysan iminka.

Intii lagu jirey sanadka 2015-ka waxay Gudiddu Golaha talabixin ka soo siisay in Goluhu Ansixiyo Masuuliyiinta Madaxweynuhu xilalka u magacaabay ee kala ah:-

- **Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)** Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka
- **Md. Eng. Cabdi Maxamed Hiirad** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

## Gudidda Sirdoonka iyo Nabadsugida

Gudidda Sirdoonka iyo Nabadsugida oo ka mid ah labo Gudi oo Gudiyada Golaha lagu soo kordhiyay waxay **30-May-2015**, kormeer xaqiiqa raadin ah ugu baxay magaalada Berbera ee xarunta gobolka saaxil guddida sirdoonka iyo amniga si ay u kormeeraan hay'adaha amniga ee heer gobol iyo qaxootiga yemen kasoo qaxay ee Berbera ku sugan siday tahay xaaladooda amni, Xubnaha guddidu intii ay joogeen waxay la kulmeen, qaxootiga yemen, ciidamada badda iyo ciidamaba boliska waxay su'aal iyo xogwaraysi ka waydiiyeen xaaladaha dhabta ah ee ay ku sugan yihiin dadkaasi Qoxootiga ahi.

## 13. Guddi Hawleedyada Goluhu Saaray (Ad hoc Committees): -

Waxaa **31/08/2015** Gudi gaar ah (Ad hoc Committee) loo saarey Xeerka Waxbarashada inay ka soo talo-bixiyaan isla markaana Xeerka isku soo guraan, waxayna Gudiddaasi ka koobneyd 10 Mudane oo kala ahaa: -

1. Md. Maxamed Cumar Aadan (Jiir) Gudoomiye
2. Md. Ibraahim Axmed Heybe Xubin
3. Md. Ibraahim Axmed Raygal Xubin
4. Md. C/qaadir Jaamac Xaamud Xubin
5. Md. Maxamed Faarax Qabile Xubin
6. Md. Xasan Cawaale Caynaan Xubin
7. Md. Faarax Maxamuud Cabdule Xubin
8. Md. C/raxman Yuusuf Cartan Xubin
9. Md. Naasir X. Cali Shire Xubin
10. Md. Maxamuud Axmed Obsiiye Xubin
11. Md. Maxamed Xusen X. Ciise Xubin

## 14. Aqoon korodhsiyo iyo Tababarada: -

Shaqaalaha Goluhu waxay qaateen tababaro dhawr ah oo kala ah sidan: -

- (tababar la xidhiidha **Wax-Iibsiga** (Procurement) oo uu bixinayay khabiir la-taliye dhinaca farsamada ah ee hay'adda UNDP gaar ahaan mashruuca la yidhaa taageerida Dastuurka iyo Baarlamanka, waxaanu muddo laba (2) cisho ah Barayey shaqaalaha Baarlamaanka casharo ku saabsan Procurements iyo **habsami maamulka mashaariicda,** dhinaca kale mudadii ay socday tababarkan waxaa shaqaalaha golahu uga soo xaadireen si aad u saraysa waxay ka faa'iidaysteen wax aad u fiican oo anfac u leh shaqada ay qaranka u hayaan.

- Tababar ku saaabsan **Dabagalka iyo Qiimaynta Hawlaha** (Monitoring and evaluation) oo uu bixinayey Sarkaal ka tirsan Hay'adda UNDP, waxaanu mudo laba cisho ah ku tababarayey shaqaalaha Gobolada casharo la xidhiidha monitoring and evaluation sida loogu sameeyo hawlaha shaqo ee socda ee golahu qabanayo.

- Waxa kale oo Goluhu sameeyey barnaamuj si joogto ah loo wadi doono oo Da'yarta Jaamacadahalagu Barayo Hawlaha shaqo ee Baarlaamanka. Waxay mas'uuliyiinta Golaha wakiiladu casuumad u fidiyeen tiro kooban oo dhalinyaro ah oo ka socota jaamacada Hargeysa iyo dhawr kale oo ka socdey Dalada Dhalinyarada ee SONYO, si ay hal maalin baarlamaanku uu u tuso sida u shaqeeyo, xafiisyadiisa iyo qaabdhismeedkiisaba, waxaa casharo kala duwan siiyey dhalinyaradan xoghayaga guud Mudane Cadbrisaq Siciid Ayanle iyo la taliyaha sharciga ee Golaha Mud. Mustafe Mohamed Dahir.

  Dhinaca kale dhalinyaradan oo u muuqday kuwa diyaarsan oo u heelan inay wax badan ka ogaadaan sida baarlamanku u shaqeeyo waxay su'aalo kala duwan waydiiyeen macalimintii casharada siinaysay, waxaanay sidoo kale macalimiintu uga jawaabeen dhamaan su'aalihii ardeydu qabtey.

## 15. Waxqabadkii Maamulka Goluhu soo kordhiyay: -

### Buugaag Goluhu Sameeyay: -


Waxaa bishii July ee sanadkan 2015 Golaha u qabsoomey inuu Markii ugu horeeyay Soo saaro oo Sameeyo Buug, Buugtaas oo isugu jiraan 3 Buug oo ah Buug laga diyaariyay (Hadal-qoraalka) Doodaha Xeerarka, Warbixinada iyo Soo jeedimaha Fadhiyada Golaha, iyadoo la raacayo hanaanka baarlamaanada (Parliamentary Procedure) waxaa ka mid ah in dhamaan Wixii ka dhaca fadhi kasta oo uu yeesho la duubo, la qoro, lana recordgareeyo, isla markaana laga sameeyo Buug leh Cadad kala dambeeya iyo Habraac qoraal.

Golaha Wakiiladu isagoo taa raacaya wuxuu soo saarey 3 Buug Hadal-qoraal (Hansard) markii ugu horeysay kuwaas oo ay ku qoran yihiin dhamaan wixii laga Hadley fadhiyada Golaha Wakiilada intii ka dambeysay 01/10/2010 Kal-fadhigii 13aad ilaa Maanta oo aynu ka soo baxney Kal-fadhigii 27aad, **Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda** Golaha oo hormood u aheyd soo saarista Buugtaas, waxayna u soo kala baxeen saddex Cadad (Volumes) oo kala ah: -

- **Volume 1 (cadaddka 1aad)** oo ka kooban Hadal-qoraaladii Kal-fadhigii 13aad ilaa Kal-fadhigii 20aad kuna taariikheysan 01/10/2010 ilaa April 2013.

- **Volume 2(cadaddka 3aad)** oo ka kooban Hadal-qoraaladii Kal-fadhigii 21aad ilaa Kal-fadhigii 24aad kuna taariikheysan 22 April 2013 ilaa 20 January 2014.
- **Volume 3(cadaddka 3aad)** oo ka kooban Hadal-qoraaladii Kal-fadhigii 25aad ilaa Kal-fadhigii 27aad kuna taariikheysan 05 May 2014 ilaa 25 May 2015.

Iyadoo Wixii iminka ka dambeeya si joogta ah loo soo saari doono isla markaana loo qeybinayo Mudanayaasha si Mudane kasta wixii uu ka Hadlo oo Buug ah uu helo una noqdaan kuwo taariikhi ah la dhaxlo kumanaan sano ka dib noqdaana tixraac laga dheegto shaley halkii la marayay iyo qadiyada taagneyd markaa siduu uu Golaha Wakiiladu u naaqishey ama uga hadley arrin markaa taagneyd





Sidoo kale waxaa Buugtaa ka mid ah Hand Books ka kooban 15 Buug oo kala duwan kuwaas oo ay ka mid yihiin Buuga Qaab-dhismeedka Golaha Wakiilada **(Organogram Structure of HoR)** iyo Buug Qaabka loo Sameeyo Hadal-qoraalada iyo Warbisxinada Golaha iyo Gudiyada **(Hansard production and Committee Verbatim Reports Guidelines)** iyo kuwa kale.

- **Jaraa'id Goluhu leeyahay oo la soo saarey: -**

Waxa kale oo isna Goluhu Sanadkan soo saarey Jaraai'd lagu qorayo Dhamaan dhacdooyinkii Fadhiyadii Goluhu yeeshay Wax qabadkoodii, Shaqooyinkii Gudiyada Goluhu qabteen, Wixii Maamulka iyo Shaqaalaha u suurtoobey iyo Guud ahaan Wararka, Jaraa'idkaas oo loo bixiyay-**Xogsidaha Wakiilada,** waxaa laga daabacey 500 nuqul, Waxaana loo qeybiyay dhamaan Mudanayaasha Golaha iyadoo la geynayo Gobolada iyo Degmooyinka ka kooban yahey si loo agaado wax-qabadka iyo Shaqada Golahni Qaranka hayo,

Waxaana Soo saarey **Waaxda Xidhiidhka Bulshada iyo Warbaahinta** oo ka mid ah 8 Waaxood ee Golaha Wakiilada.

- **Mareegtada (Website) Golaha oo la Casriyeeyay: -**

Golaha Wakiiladu wuxuu hore u lahaa Mareegto taas oo lagu aheyd www.Somalilandparliament.net mareegtadaas oo door weyn ka qaadan jirtey xidhiidha Bulshada iyo Golaha isla markaana aheyd meel Goluhu ku soo bandhigo wax qabadkiisa iyo wixii ka socda si joogta ah, hadaba si loo casriyeeyo isla markaana loo xidho si aan cid kale u sameysana godadka kale ee laga sameyn karo Website huwan magaca Golaha Wakiilada ama Baarlamaanka Somaliland oo aanu Goluhu gacanta ku heyn waxaa la sameeyay:-

- Mareegto Cusub oo ah www.somalilandparliament.com ayaa la sameeyay halkii markii hore ka aheyd .net.
- Waxaa casriyeyn lagu sameeyay fornt-ka websiteka iyadoo la darsey qaababka Website-da **B**aarlamaanada caalamku u sameysan yihiin.
- Waxaa laga saarey Webistii hore vires galey oo mararka qaar sababi jirey inuu Data-dii ama xogtii la galiyay laga dheehan waayo.
- Sidoo kale waxaa la kordhiyay qeybaha xoggalinta oo lagu darey waxyaabo badan sida Video-ga Muuqaalka ah iyo Newsletter-ka Golaha oo E-News ah.

Casriyeynta iyo balaadhinta Mareegtada Goluhu waxay ka mid tahey waxyaabihii Maamulka Goluhu ku guuleystay intuu lagu jirey fasaxii Kal-fadhigii la soo dhaafey, waxaana farsamadaas casriyeynta iyo balaadhinta sameeyay Shirkada **RAASAMAAL** oo uu leeyahey Eng. Guuleed Xasan Maxamed (Gabyaaye) oo ah aqoonyahan iyo khibiiru Techonolgy-ga Casriga ah.

- **Xeerarkii hore ee Typeka ahaa Soft laga dhigey: -**

Waxyaabaha kale ee Golaha u suurto-galey waxaa ka mid ah in dib loo qoro Xeerkii hore ee Dalka oo ku qornaa Type, kuwaas oo aan laga heyn soft copies, Xeerarkaas marka loo baahdo ay dhib aheyd in la helo, sidoo kale waxay Xeerarkaasi qarka u saarnaayeen inay baaba'aan oo masaxmaan madaama wakhti hore lagu qorey type waraaqihiina duugoobeen, laga heyn mid kasta wax ka badan hal nuqul, waxa kale oo dhib aheyd wakhtiyada Goluhu u baahdo inuu ku sameeyo wax ka badal iyo kaabis waxay noqoneysay in dib loo

qoro inta aan la galin taas oo caqabad ku aheyd Golayaasha iyo Guud ahaanba Qaranka.

Isagoo Maamulka Goluhu arrintaa ka duulaya Wuxuu suurto-galiyay intii lagu jirey sanadkii 2015-kii inuu soft laga dhigo oo dib loo garaaco Xeerarka kala ah:-

- Xeerka Jinsiyada Somaliland.
- Xeerka Xaalufka iyo Nabaad Guurka.
- Xeerka Hant-dhowrka Guud
- Xeerka Kaluumeysiga
- Xeerka Socdaalka (Immigratoin law)
- Xeerka la-haanshaa Dhul-beereedka
- Xeerka Nootaayooyinka
- Xeerka Mideynta Tacriifada Dawladaha Hoose
- Xeerka kala-xadeynta Ganacsiga
- Xeerka la-gadaalanka Mukhaadaraadka
- Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta.
- Xeerka Maalgashiga Shisheeyaha

### ➢ **Finger printing Xaadiriska Mudanayaasha iyo shaqaalaha: -**

Horaantii November isagoo Xoghayaha Guud ee Goluhu ku dedaalaya sidii shaqaalaha Goluhu u gudan lahaayeen Shaqadooda una ilaalin lahaayeen Wakhtiga shaqada wuxuu soo kordhiyay in Goluhu yeesho (finger Printings) lagu kaantaroolayo shaqo ka soo xaadirida Shaqaalaha iyo Mudanayaasha Golaha, finger printings oo laba ah waxaa iminka wixii ka dambeeya Goluhu kaga reysan doonaa warqadii xaadiriska Mudanayaasha iyo Shaqaalaha, waxayna fududeyneysaa in si casriya loo kantaroolo.

Waxaana Furitaankii Fadhigan lagu bilaabey isticmaalka Fingure Printing-ka Mudanayaasha iyadoo ay xalkaa dhamaan iska xaadiriyeen Mudanayaashii ka soo qeyb-galey fadhiga iyo Shir-gudoonka Golaha Gudoomiye C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro), Gudomiye Ku-xigeenka 1aad Md. Basahe Maxamed Faarax iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed.

## 16. Kormeeradii: -

Sida ku xusan Dastuurka JSL kormeerada iyo dabagalida Baarlamaanku ku dulsamaynayaan hay'addaha laamaha Fulinta, waa tiirka mid ah shaqada Baarlamaanku u igmanyahay kuwaas oo kala ah (**Matalida dadka, sharci samayn iyokormeerida iyo dabagalida hay'adda dawlada*).***

**31 May 2015,** Xoghaya Guud ee Golaha Wakiilada Mudane Cabdirisaaq Siciid ayaanle oo ay weheliyaan Agaasimaha Qorshaynta Mudanaye Cabdinasir Cismaan Maxamuud, iyo Lataliyaha Sharci ee Golaha Mustafe Maxamed Xaji Dahir, ayaa waxay safar shaqo ku tageen xafiiska Golaha Wakiiladu ku leeyahay Magaalada Laascaanood ee Xarunta Gobolka Sool, safarkan shaqo ee saraakiisha maamulka golahu wuxuu daarnaa u kuurgalida hawlaha shaqo ee xafiiskani u fidiyo dadweynaha degan gobolka iyo habsami u socodka shaqo ee xafiiska.

Intii waftigan ay joogeen laascood waxay kulamo kala duwan la qaateen mas'uuliyiiinta degmada laascaanood, waxayna la kulmeen mayor ku xigeenka magaalada laascaanood kaasi oo ay ka wada sheekaysteen guud ahaan xaaladaha gobolka iyo gaar ahaan xafiiska baarlamaanka iyo kan dawlada hoose ee degmada.

Markii waftigan soo dhamaysteen safarkoodii shaqo ee laascaanood waxaa kale oo ay soo mareen xafiisyada baarlamaanka ee ku kala yaala Burco iyo Berbera, kuwaasi oo ay soo kormeereen sida ay u wataan shaqooyinkooda iyo adeegyada ay u fidinayaan dadweynaha degan goboladaas,

waxaa ilaa bilowgii 2014, baarlamaanku kulahaa xafiisyo shanta magaalo madax ee shanta gobol ee kala ah, Borama- Gobolka Awdal, Berbera- Gobolka Saaxil, Burco Gobolka Togdheer, Laascaanood-Gobolka Sool iyo Ceerigaabo-Gobolka Sanaag, Ujeedooyinka xafiisyadani baarlaamaanku u furtayna waxay ahayd in dadweynaha degan gobolada la gadhsiiyo xeerarka baarlamanku ansixiyo, iyo warbixinaha kale ee baarlamaanku soo saaro iyo in shaqaalaha xafiisyadani ay noqdaan kuwa u dhuun daloola hawlaha ka jira deegaadani si ay warbixinta ula wadaagaan xildhibaanadii laga doorteey deegaanadan, iyo in la isku soo dhaweeyo iska warhaynta dadyowga degan deegaanadan iyo mudanaayshii ay doorteen si ay u noqdaan kuwa iska warhayo oo leh meel iyo goobo ay ka wada xidhiidhan, xafiisyaddani waa qaar xildhibaandu ku shaqeeyan marka ay joogaan goboladii laga soo doortay.

## ❖ <u>Safar Xildhibaan Baar Siciid ku tagtey Gobolka laga soo doortey ee Sanaag: -</u>

**Xildhibaan Baar Siciid Faarax** oo ka mid ah Xildhibaanada laga soo doortey Gobolka Sanaag ayaa Safar Shaqo ku tagtey Gobolkaas **05/09/2015,** safarkaas oo qaatey mudo 10 cisho ah waxaa ku weheliyay Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyada ee Golaha Wakiilada Mr. Cawad Cali Maxamed, waxay Xildhibaanadu kormeer ku tagtey Xarunta Gobolka Sanaag ee Ceerigaabo intii ay Xildhibaanadu ku sugney Gobolka Sanaag Waxyaabaha ay Gobolka ka soo qabatey waxaa ka mid ahaa: -






**05/09/2015** Waxay Kulan u qabatey Bulshada Magaalaca Ceerigaabo kulankaas oo u jeedadiisu aheyd kufsiga iyo Tacadiyada ka dhan ka ah Haweenka oo lagu gorfeynayay Xeerka Kufsiga oo Golaha Horyaala, waxaana ka soo qeybgalay Kulankaas 50 qof oo uu ugu horeeyo Maayor Magaalca Ceergaabo Md. Ismaaciil X. Nuur, Haween, Dhalinayaro, Cuqaal, Booliiska, Dambi-baadhista iyo Maxkamadaha Magaalaca Ceerigaabo waxaana kulankaa





**Wixii ka soo baxay kulanka: -**

- In Bulshada laga soo saxo asaaska oo ah qoyska laguna soo barbaariyo caruurta dhibaatada kufisga inay tahey wax ku xaaraan ah shareecada islaamka, caqliga saliimka ahina diidayo.
- In dadka ku dhaca falkaas foosha xun la mariyo ciqaabtii shareecadu ku xukuntey in la mariyo oo ah arjum iyo dil si looga waantoomo.
- In Xeerka Golaha horyaal ciqaata ku qoran aaney Waafaqsaneyn Shareecada Islaamka oo aaney ku filnayn qofka ku caya dambi intaas oo dhan le'eg.
- In Baarlamaanku Xeerka horyaal ku daro qodobo yareyn kara ama wax ka qaban kara korodhka dhacdadaas kufsiga ama kufsi wadareedada.

- In Madax-dhaqameedka iyo Odayaashu ka waantoomaan inay gacmaha la galaan kiis kufsi oo Bahda Cadaalada iyo Garsoorku gacanta ku hayaan si loo mariyo qofka wax geystay ciqaabtiisii dhibantana xaqeedii loo siiyo.

Sidoo kale Waxay Xildhibaanadu soo kormeertay Jeelka Magaalacada Ceergaabo, Xabsiga Dhexe, Xarunta Dabmi-baadhista iyo Cisbitaalka Guud ee Magaalada Ceergaabo iyadoo dhamaan la kulantay Taliyayaasha Goobahaas, Maxaabiista ku xidhneyd oo ay ka xogwareysatey Xaaladooda, sidoo kale Cisbtaalka waxay ku booqatey bukaan jiifka yaal iyo wax ka weydisay Maamulka Xaalada guud ee Cisbtitaalka.











---

**Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka: -01/10/2015 ilaa 09/10/2015** waxay Guddidu safar shaqo ku tageen qaar ka mida gobolada dalka sida Awdal, Gabiley, Hawd, Daadmadheedh, Togdheer, Saraar, Sool, Sanaag iyo Saaxil, ujeedada safarkani waxa uu ahaa xog-ogaal u noqoshada Xaalada Gobolada, qiimeynta Gobolada dalku waxa ka gaadha Miisaaniyada guud ee Qaranka iyo sida Maamul daadejintu Gobolada u gaadhey.





Intii Gudiddu Safarkan ku jirtey Waxay Gobol kasta kula kulmeen Maamulka Gobolka oo weheliyaan Isuduwayasha Wasaaradaha.Haya'daha Dawlada ee Gobolkasta iyo Golayaasha Deegaanka Degmooyinka magaalo madaxda u ah Goboladaas.

## 17. Wufuuda Golaha Timid: -

**12 March 2015** ayaa Gudoomiyaha Golaha wakiiladda **Mudane Cabdiraxman Maxamed Cabdilahi** oo uu wehiliyo Gudoomiye ku-xigeenka labaad ee Golaha **Mudane Cali Yusuf Axmed** iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada **Mr.**

**C/risaaq Siciid Ayaanle** ayaa xafiiska Gudoomiyaha Golaha ku qaabilay wefti ka socda Hay'adda Chemonics, "Chemonics waa company socodsiindoona mashaariicdii ay USAID la qabato Somaliland iyo Somalia".

Xubnaha ka socday chemonics ayaa booqasho iyo isbarasho ugu yimid golaha wakiilada, waxaana ay ka koobnaayeen sadex masuul, labada dhinac intii shirku u socday waxa laga wadahadlay baahiyaha aas-aasiga ah ee Baarlamaanka hada haya iyo hiigsiga baarlamaanka oo mudo sadex sano ah oo halsano ka hor la ansixiya,y sidii wax ay uga wada qaban lahaayeen, waxay madaxda chemonics sheegeen in mashruucoodu leeyahay sadex ujeedo oo kala ah, in lala shaqeeyo baarlamaanka, fulinta iyo ururada aan dawliga ahayn.



**Gudoomiyaha Goluhu Kulan uu la yeeshey Hay'adda CHINOMICS ee oo ah Shirkad Mareykan ah oo Mashaariicda USAIDka Somaliland iyo Somaliya fulisa.**

Shirkan wuxuu ku soo gabo-gaboobay is afgarad iyo jawi fiican, waxayna chemonics sheegeen wakhtigaas in ay xafiiskoodii Hargeisa si dhakhso ah uga faranayaan, iyagoo bilaabayana mashaariicdooda sida ugu dhakhsaha badan.

**13/01/2015** ayaa Guddoomiye ku-xigeenka 2aad **Md. Dr. Cali Yusuf Axmed** iyo Xildhibaano kale oo ka tirsan Golaha Wafti ka socday Dawlada Hoose ee Magaalada shefield ee Dalka Ingiriiska kuwaas oo ka mid ahaa xildhibaano wakhtigaas Golaha deegaanka ee magaaladaas horgeeyay mooshin lagu aqoonsanayo Somaliland kaas oo noqday aqoonsigii u horeeyay ee Golaha deegaanka ee magaalada shefield uu siiyo dalkan Somaliland.



Xildhibaanadan oo ah kuwa si wanaagsan ula shaqeeya shacabka Somaliland ayaa wuxuu Gudoomiyuhu Md. Dr. Cali Y. Axmed ugu horayn si diiran ugu soo dhaweeyay dalkan Somaliland iyadoo si aad ahna layskaga xog-waraystay qadiyada Somaliland iyo sidii hore loogu sii wadi lahaa.

Bishii **January 2015** ayaa waxa yimid Wafti ka socotey Ururka Dublamaasiyiinta Madaxa-banaan, waxaana Golaha ku soo dhoweeyay oo kulan Xafiiskiisa kula yeeshay Ku-simaha Gudoomiyaha ahna Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada JSL Dr. **Cali Yuusuf Axmed.**

Weftigan Diblumaasiyiinta Madaxa-banaan oo uu hogaaminayay Agaasimaha ururkaas Mr. **PUAL WHITEWAY** oo uu wehelinayay **Michle** oo dalkan Jamhuuriyada SOMALILAND hada loo soo magacaabay xafiisna ku yeelan doona wasaarada Arimaha Debeda.



Gudoomiye **Dr Cali Yusuf** ayaa warbixin dheer ka siiyey dalka iyo Taariikhdiisa guud ahaan sidii Somaliya iyo Somaliland ay u midoobeen waxyaabihii keenay kala Go'a, mudadii aynu dawlada ahayn iyo sidii dalkani halkan maanta ku soo gaadhay, waxa uu uga waramay nidaamka dimuqraadiga ah ee dalku qaatay iyo sida ay u dabaqeen guud ahaan shuruudihii dawladnimo ee dal looga baahna welise aanay dunidu indho gaara ugu eegin.



weftigan ayaa iyaguna iga mahadnaqay soo dhoweynta diiran iyo sida quruxda badan ee ee uu warbixinta u siiyey Gudoomiyuhu isla markaana waxa uu balan qaaday inay kala shaqayn doonaan Somaliland sidii ay hadafkeeda iyo hankeeda Dawlad madax banaan u noqon laheyd inay kala shaqaynayaan isla markaana waxa uu iftiimiyey inay xafiis cusub hada ka furteen Somaliland oo wax badan fududayn doona.

## 18. Safardii Dibada: -

**January 2015** ayaa Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)** Wuxuu kula Kulamay Dalka Imaaraadka Carabta Gudoomiyaha Baarlamaanka Jaamacada Carabta **Mr. Axmed Al-Jarwani** kulankaas oo ka dhacey Abu-dabi ee Imaaraadka Carabta, waxaa Gudoomiyaha oo Safar ku jooga dalkaas oo kulankaa Gudoomiyaha Jaamacada Carabta uga Waramey Taariikhda Somaliland ilaa 1960kii iyo heerarkii ay soo martey ee dib u dhiska, sidoo kale waxay iska wareysteen Xidhiidhka ka dhexeeya Somaliland iyo Dalalka Carabta, wuxuuna Gudoomiyuhu u sheegay inay Somaliland tahey dal madax banaan oo xoriyadiisii dib ugala soo noqdey wixii la isku odhan jirey Somalia, kana hirgaleen hanaanka dimuqraadiyadeed oo ka jiraan xisbiyo badan.

Gudoomiyaha Baarlamaanka Jaamacada Carabta oo xafiisku yahay Magaalada Abu-dabi wuxuu u sheegay inuu si aad ugu faraxsanyahey kulankan uu la

yeeshay Gudoomiyaha Baarlaanka Somaliland, wuxuuna tilmaamey inuu warbixintaasna u sii gudbin doono dalalka carabta, isagoo sido kale tibaaxay inay sii wadi doonaan ka baarlamaan ahaan kulamada noocan ah oo kale.

**11-april 2015,** waxa safar shaqo oo waxbarasho ugu baxay dalka Ethiopia gaar ahaan magaalada addis ababa xubno mudanayaal ah oo ka kooban 22 qof iyo 10 qof kale oo ka tirsan fulinta sida wasiir ku xigeeno iyo gudoomiyayaasha dhawr hay'adood oo madax banaan, intii ay waftigan joogeen magalada addis ababa waxay baranayeen casharo la xidhiidha hogaaminta, waxaa bare ka ahaa khabiiro aqoon dheeraada u leh hogaaminta oo u dhashay dalka Senegal, mudadii ay joogeen waftigan somaliland ka socday waxay u ahayd fursan qali ah oo ay ku kabayeen aqoonta ay u lahayeen hogaaminta, waxaana tababarkan suuro galiyey oo soo agaasimahay hay'adda UNDP qaybta Gender–ka.



**07/06/2015** Mudanayaal Golaha Wakiiladda ka mid ah oo ka qayb galay Shir Caalami ah oo in ka badan 40 dal ka soo qaybgaleen kana dhacay Caasimada Jamaica

Shirkaas oo ay goobjoog ahaayeen Gudoomiyaha Baarlamaanka Jumaica iyo Raysal Wasaaraha ayaa lagu soo gabagabeeyey magaalada NEW KINGSTON ee dalka JUMAICA.

Shirkan oo mudo todobaad ah socday ayay ka soo qayb galeen wefti ka socday Somaliland Baarlamaankeeda isla markaana uu hogaaminayay Gudoomiyaha Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha wakiilada Md. Maxamed Cali Xirsi, weheliyeena Md. Naasir X. Cali Shire iyo Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhaari) kulankaas oo ay ujeedadiisu ahayd sidii kor loogu qaadi lahaa la xisaabtanka iyo kor u qaadka habka korjoognimo ee Baarlamaanada dunida.

Kulankaas aaya waxaa warbixin dheer ka jeediyey Gudoomiyaha Gudidda dabagalka iyo la dagaalanka Musuq maasuqa ee Golaha wakiilada Maxamed Cali Xirsi waxaanu ka warbixiyey sooyaalkii taariikheed ee Somaliland iyo nidaamka ka jira, Baarlamaanka iyo sida uu u shaqeeyo, Miisaaniyada iyo heerarka ay marto iyo inta haayadood ee ka ku shaqada leh, waxa kale oo uu Gudoomiye Maxamed Cali xirsi si faahfaahsan uga waramay Guddida dabagalka iyo la dagaalanka musuqmaasuqu sida ay u shaqayso una samayso La xisaabtanka Hay'addaha Dawliga ah.

## 19. Mudanayaasha ka geeriyooday iyo ka baxay 2015-kii: -

Bishii March ee Sanadkan Waxaa Golaha ka geeriyoodey Ilaahey ha u naxariistee Laba Mudane, labadaas Mudane oo kala ahaa Ilaahey ha u naxariistee **Md. Xariir Siciid Bulaale** oo **08/03/2015** ku geeriyoodey magaalada Hargeysa ahaana mudanayaasha laga soo doortey Gobolka Sool, Mudanaha labaadna Wuxuu ahaa Ilaahey ha u naxariistee **Md. Maxamed Barkhad Miigane** oo **30/03/2015** ku geeriyoodey Magaalada Boorame oo ahayd halkii laga soo doortay laguna Aaasey, Labadaas Marxuum Ilaahey Janadii Fardowsaha ka waraabiyo.





Marxuum Md. Maxamed Barkhad Miigane Wuxuu Golaha Wakiilada ka mid ahaa 1993kii ilaa Wakhtigaa uu geeriyoodey oo noqoneysa inuu 3 ka mid ah 4 Gole ee dalka soo marey ku soo jirey, Halka Marxuum Md. Xariir Siciid Bulaale

uu ka mid ahaa Mudanayaashii la soo doortey 29 September 2005-kii oo ahaa Golihii ugu horeeyay ee Cod Bulshadu ku soo dooratey.

waxaa Golaha ku soo biirey laba mudane, labadaas mudane oo kala ah **Md. Axmed Cabdi Kaahin** oo badaley **Md. Maxamed Barkhad Miigane 30/03/2015** ku geeriyoodey Magaalada Boorame mudadaasna aan la soo buuxin xubinamadii uu ka geeriyoodey marxuumku maadama liiskii sugayaasha Xisbiga UDUB oo uu ka soo baxay sugayaashiisu dhamaadeen Mudanaha iminka buuxiyayna xiligaa hayay Xil Wasiirnimo oo uu iska casiley dhamaadkii bishii Ocotober.





Halka Mudanaha kale oo ah **Md. Ismaciil Maxamed Xasan** uu badaley **Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)** oo baneeyay Xubinmadiisii Golaha ka dib markii Madaxweynuhu u magacaabey Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka, sidaa darteed labadan Mudane oo Maxkamda Sare soo dhaarisey ka dib markii Golaha Wakiiladu buuxintooda ka codsatey Komishanka Doorashooyinka Qaranka oo isna markii uu soo saarey u gudbiyay Maxkamada sare si ay u soo dhaariso buuxinta Xubinimada Golaha.

## Appendix

**Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiilada: -**

| No. | Magaca | Gobolka | Xisbiga |
|---|---|---|---|
| 1. | Abuubakar C/raxmaan Good | Awdal | Kulmiye |
| 2. | Ikraan Xaaji Daauud Warsame | Awdal | Kulmiye |
| 3. | Mahdi Xuseen Cadare | Awdal | Kulmiye |
| 4. | C/laahi Axmed Yuusuf (Madar) | Awdal | UCID |
| 5. | Mahdi Cabdilaahi Maxamuud | Awdal | UCID |
| 6. | Muuse Maxamed Ismaaciil Waabari | Awdal | UCID |
| 7. | Axmed Maxamed Maxamuud (Afweyne) | Awdal | UDUB |
| 8. | Axmeed Barkhad Obsiiye | Awdal | UDUB |
| 9. | Cabdi Maxamuud Jaamac Gaagaale | Awdal | UDUB |
| 10. | Cali Sheekh Ibraahin Araye | Awdal | UDUB |
| 11. | Mahdi Xaaji Xasan Sugaal | Awdal | UDUB |
| 12. | Maxamed Barkad Miigane | Awdal | UDUB |
| 13. | Maxamed Yaasiin Sheekh Cali Ayaanle | Awdal | UDUB |
| 14. | Axmed Cabdi Nur Kijaandhe | Hargeisa | Kulmiye |
| 15. | Axmed Ibraahin Daahir Axmed (Ax. weyne) | Hargeisa | Kulmiye |
| 16. | Axmed Maxamed Diiriye NacNac - | Hargeisa | Kulmiye |
| 17. | Cabdicasiis Maxamed Samaale Ducaale - | Hargeisa | Kulmiye |
| 18. | Cali Yuusuf Axmed Jaamac | Hargeisa | Kulmiye |
| 19. | Ibraahin Axmed- Haybe | Hargeisa | Kulmiye |
| 20. | Maxamed X Maxamuud Cumar- Xaashi | Hargeisa | Kulmiye |
| 21. | Maxamuud Axmed Obsiiye | Hargeisa | Kulmiye |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 22. | Bashir Sheekh Xuseen Tukaale | Hargeisa | UCID |
| 23. | Cabdiraxmaan Cismaan Caalin | Hargeisa | UCID |
| 24. | Ibraahin Mahdi Buubaa | Hargeisa | UCID |
| 25. | Khadar Aadan Xuseen | Hargeisa | UCID |
| 26. | Maxamed Baaruud Shide | Hargeisa | UCID |
| 27. | Xaashi Xuseen Caabi | Hargeisa | UCID |
| 28. | Aadan Muxumed Hoorri (Mataan) | Hargeisa | UDUB |
| 29. | C/kariim Aw- Cali Shabeel | Hargeisa | UDUB |
| 30. | C/qaadir XIsmaaciil Jirde | Hargeisa | UDUB |
| 31. | Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac | Hargeisa | UDUB |
| 32. | Cali Obsiiye Diiriye (Cali Gabiley) | Hargeisa | UDUB |
| 33. | Xasan Cawaale Caynaan | Hargeisa | UDUB |
| 34. | Maxamed Xuseen X Ciisse | Saaxil | Kulmiye |
| 35. | Siciid Cilmi Rooble | Saaxil | Kulmiye |
| 36. | Axmed Maxamed Cali (Beegsi) | Saaxil | UCID |
| 37. | Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi (Cirro) | Saaxil | UCID |
| 38. | Faarax Maxamuud Cabdulle | Saaxil | UCID |
| 39. | Maxamed Faarax Qabiile | Saaxil | UCID |
| 40. | Aadan Xaaji Diiriye Dirir | Saaxil | UDUB |
| 41. | Axmed Xasan Aadan Waysocadde | Saaxil | UDUB |
| 42. | Maxamed Nuur Carraale | Saaxil | UDUB |
| 43. | Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable) | Saaxil | UDUB |
| 44. | Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Cartan | Sanaag | Kulmiye |
| 45. | Cali Maxamed Aadan Cali Barre | Sanaag | Kulmiye |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 46. | Ibraahim Jaamac Cali Maxamed Reyte | Sanaag | Kulmiye |
| 47. | Maxamed Cismaan Maxamed Bulqaas | Sanaag | Kulmiye |
| 48. | C/raxman Maxamed Talyanle | Sanaag | Kulmiye |
| 49. | Maxamed Cali Jibriil | Sanaag | UCID |
| 50. | Saleebaan Cawad Cali | Sanaag | UCID |
| 51. | Baar Siciid Faarax | Sanaag | UDUB |
| 52. | Cabdiqaadir Jaamac Xaamud | Sanaag | UDUB |
| 53. | Ibraahin Carraale Cabdi (Ruush) | Sanaag | UDUB |
| 54. | Ibraahin Maxamed Xuseen (Dhaadheere) | Sanaag | UDUB |
| 55. | Maxamed Saalax Cige | Sanaag | UDUB |
| 56. | Axmed Ducaale Bullaale | Sool | Kulmiye |
| 57. | Baashe Maxamed Cabdi | Sool | Kulmiye |
| 58. | Ibraahin Axmed Reygal | Sool | Kulmiye |
| 59. | Maxamed Jaamac Cabdi | Sool | Kulmiye |
| 60. | Cabdiqaadir Askar Xasan | Sool | UCID |
| 61. | Siciid Maxamed Cilmi | Sool | UCID |
| 62. | Aadan Tarabi Oogle | Sool | UDUB |
| 63. | Cabdiraxmaan Muuse | Sool | UDUB |
| 64. | Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool) | Sool | UDUB |
| 65. | Maxamuud Dhunkaal Gutaale | Sool | UDUB |
| 66. | Saleebaan Yuusuf Cali Koore | Sool | UDUB |
| 67. | Xariir Siciid Bullaale | Sool | UDUB |
| 68. | Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne) | Tog-dheer | Kulmiye |
| 69. | Maxamed Cumar Aadan | Tog-dheer | Kulmiye |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 70. | Maxamed  Cali Xirsi | Tog-dheer | Kulmiye |
| 71. | Maxamed X Yuusuf Axmed (Waabeeyo) | Tog-dheer | Kulmiye |
| 72. | Xamse Maxamed Gaadaweyne | Tog-dheer | Kulmiye |
| 73. | Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan) | Tog-dheer | Kulmiye |
| 74. | Jaamac Xasan Aadan | Tog-dheer | UCID |
| 75. | Maxamed Jaamac Cali | Tog-dheer | UCID |
| 76. | Naasir Xaaji Cali Shire | Tog-dheer | UCID |
| 77. | Xuseen Maxamed Cigeh | Tog-dheer | UCID |
| 78. | Axmed Maxamed Nuur Maxamed | Tog-dheer | UDUB |
| 79. | C/casiis Ismaaciil Ducaale | Tog-dheer | UDUB |
| 80. | Cali Xaaji Maxamed Muuse | Tog-dheer | UDUB |
| 81. | Farxaan Maxamed Cali | Tog-dheer | UDUB |
| 82. | Xuseen Ismaaciil Yuusuf | Tog-dheer | UDUB |

Liiska Shaqaalaha Golaha Wakiilada:-

| N | Names | Title |
|---|---|---|
| **1.** | **Abdirisak Sa'ed Ayanle** | **General Secretary** |
| **2.** | **Jamal Jama Hassan** | **Deputy General Secretary** |
| 3. | Abdi Ismcil Xawadle | **Director of Admin and Finance Department** |
| 4. | Awad Ali Mohamed | **Director of Hansard, plenary and Committee Department** |
| 5. | Mahamuod Sulamen Omer | **Director of Information, Technology and Research Department** |
| 6. | Abdinasir Osman Mahamoud | **Director of Planning Department** |
| 7. | Hibo Mohamed Ibrahim | **Director of Archives library Department** |
| 8. | Ismahan Yusuf Ibrahim | **Director of Human Resource Department** |
| 9. | Ahmed Mohamed Eige | **Director Of Protocol and Security Department** |
| 10. | Sulieman Abdisitar Dubad | **Director of Communication and Public Relations Department** |
| 11. | Hamse Mohamoud X. Muuse | **Logistic Officer** |
| 12. | Mubarik Farah Warsame | **Adviser** |
| 13. | Mohamed Abdirahman Ducale | **Adviser** |
| 14. | Mustafe Mohamed X. Dahir | **Adviser** |
| 15. | Ahmed Ali Kahin | **Adviser** |
| 16. | Huda Mohamed Ahmed | **Head section of the Office G. Secretary & Committees Section** |
| 17. | Farah Ibrahim Gamute | **Head of Accounting Office** |
| 18. | Mohamed Sa'eed Husein | **Head of Adm.& finance** |
| 19. | Asiya Rashiid Egge | **Head of Section HMR** |
| 20. | Aydarus Ega Khayre | **Head of the Photo Copy office** |

| | | |
|---|---|---|
| 21. | Ali Axmed Ibrahim | **Secretary of Security and Intelligence Affairs Committee** |
| 22. | Ayanle Ahmed Abdi | **Secretary Standing & Disciplinary Committee** |
| 23. | Yuusuf Habiib Hussien | **Secretary Livestock & Environment Committee** |
| 24. | Maxamed Yusuf Ayanle | **Head Section IT and Secretary Finance & Economic Committee** |
| 25. | Faysal Ibrahim Esse | **Secretary of the Committee of Roads** |
| 26. | Abdillahi Abdi Adan | **Head Section of the Hansard and secretary of CJJ&HR** |
| 27. | A/Rahman Jama Nur | **Head section Media and Secretary of Internal Affairs & defense** |
| 28. | A/wahab Ahmed Mohamed | **Secretary of Foriegn Affairs Committees** |
| 29. | Sahal Guled Xadi | **Head Section of Security and Secretary of Soc & Religion Affairs** |
| 30. | Amal Ahmed Iman | **Secretary Of Archives Office** |
| 31. | Wacaysa Ali Ahmed | **Head section Department of Planning** |
| 32. | Mohamed Mohamud Osmaan | **Head Section Department of Planning.** |
| 33. | Mahad Omer Sa'eed | **Head section of Plenary and Secretary Public Accounts Committees** |
| 34. | Khadra Suber Nux | **Secretary** |
| 35. | Mohamed Hussein Eilmi | **Secretary Hazard the office** |
| 36. | Mohamed Hassan Mohamed | **Camera Man** |
| 37. | Sa'ed Jirde Haybe | **Camera Man** |
| 38. | Ahmed Osman Farah | **Head section of Protocol** |
| 39. | Dheg Adan Bile | **Mechanics and Electricity** |
| 40. | Fadxiya Ali Hassan | **Secretary of Protocol** |
| 41. | Guled Ahmed Jama | **Supporter Electricity** |
| 42. | Mohamed Ibrahim Ismail | **Secretary** |
| 43. | Ahmed Farah Bodhle | **Secretary of the Protocol** |

| | | |
|---|---|---|
| 44. | Abdikarim Aydiid Abokor | **Secretary** |
| 45. | Mustafe Nur Farah | **Secretary** |
| 46. | Cismaan Maxamed Axmed | **Secretary** |
| 47. | C/risaaq Axmed Aadan | **Secretary** |

***C/risaaq Siciid Ayaanle***

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

Filename: Report of Year 2015
Directory: C:\Users\CAWAD\Documents
Template: C:\Users\CAWAD\AppData\Roaming\Microsoft\Templates\Normal.dotm
Title:
Subject:
Author: Awad Mohamed
Keywords:
Comments:
Creation Date: 17/02/2017 17:54:00
Change Number: 7
Last Saved On: 06/03/2017 21:42:00
Last Saved By: CAWAD
Total Editing Time: 25 Minutes
Last Printed On: 06/03/2017 23:19:00
As of Last Complete Printing
Number of Pages: 46
Number of Words: 10,183 (approx.)
Number of Characters: 58,045 (approx.)